



FOR IMMEDIATE RELEASE

January 13, 2021

7:25 AM

CONTACT PERSON

Jeremy Eschliman

Health Director,

888-669-7154

Kiisaska cusub ee COVID-19 ayaa la soo sheegay.

KEARNEY- Labaatan iyo afar (24) kiis oo cusub oo ah COVID-19 waxaa soo sheegay Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Laba Webi ee ku taal toddobada gobol ee ay u adeegto Talaadada Janaayo 12. Fadlan ka hubi websaydhka Labada Webi wixii macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan muwaadiniinteenna hadda ku jira COVID-19.

Kiisaska cusub ee la xaqiijiyay Talaadada ah:

- Degmada Buffalo - 12
- Degmada Dawson - 4
- Degmada Franklin_1
- Degmada Kearney - 2
- Degmada Phelps – 5

Feejignaan ku sii jir si looga hortago faafitaanka COVID-19 ayaa ka muhiimsan sidii hore. Shaqadaada adag iyo dadaalka aad ku bixisay nolol maalmeedkaaga waa in lagu bogaadiyo. Isbedelada aad ayey u adag yihiin, laakiin waxay muhiim u yihiin mustaqbalka Nebraska iyo muwaadiniinteenna. Talaabooyinka badan ee aad qaadi kartaan adiga iyo qoyskaaguba si aad uga hortagtaan faafitaanka COVID-19, qofwalba wuu badbaadayaa.

Fadlan xusuusnow inaad raacdo Saddexda Cs:

- Goobaha Camiran
 - o Ka fogow isku soo uruurinta kooxo marka aadan sii wadi karin masaafada dhan lix-fuudh dadka kale.
- Xir xiriirada
 - o Xidho maaskaro ama ku ilaali masaafada lix fuudh dadka aan la noolayn.
- Meelaha Xiran
 - o Ka fogow meelaha xiran ee leh hawo xumo.

Laba Wabi waxay sii wadayaan inay kula taliyaan muwaadiniinta inay guryahooda joogaan markay jiran yihiin oo ay raadsadaan daryeel caafimaad markii loo baahdo.

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha ayaa furtay khadka macluumaadka ee gobolka oo dhan (COVID-19) si ay gacan uga geysato ka jawaabidda su'aalaha guud iyo in lala wadaago macluumaadka ugu dambeeyay iyo ilaha Nebraskans si loogu wargaliyo.

Lambarku waa 402-552-6645. Saacadaha shaqada waa 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo maalin kasta.

Ku saabsan waaxda caafimaadka dadweynaha(Two Rivers Public Health Department) waaxda caafimaadka dadweynaha Waxay kaashanayaan la-hawlgalayaasha iskaashanaya, hoggaamiyeyaasha bulshada iyo dadweynaha si kor loogu qaado qaab nololeed caafimaad leh,iyo in la bixiyo waxbarashadda ka hortagga waxayna xaqiijineysaa tayada deegaanka, iyo in la aburo jaaliyado caafimaad iyo badbaado badan dhammaan kuwa ku nool degmada waxad TRPHD ka la socota facebooka iyo twitterka @2RPHD.